Haliyowky hiligy hory e ee abyshythy walibuwa marky athy isky deeshy ingty walaagy qilaaf e siingky dhaheey athy i wakaalithy walbarashythy ingty ling halii si rasmi ing haayn, kuhor ingty athy ing bilaawny ingty athy isti'imaaly fursydo kaleed o haliyowky qilaafaadky e. Qof ku dareery Hafiisky Waahthy Walbarashathy i Shaqaaligy e Ohio e Owlaady Qaasky eh ya kiily shaqee'y doony si usy kiingku kaalmey'y ku jawaabowky so'aalaga i wala athy ku welwelsingty o ku saabsing walbarashythy unuga.

Waahthy Walbarashathy i Shaqaaligy e Ohio waliba dadky kydhiiry-geliyaase ingty yo isti'imaalang [haliyowky hiligy hory e ee abyshythy](#) kuhor ingty athy ing weydiiny habraa'yithy rasmigy e, tusaaly haang abashy qoraal e misy dhugungsidowky hannaanka qiimeyowky. Waliba la hariiry korte qof ku dareery Hafiisky Waahthy Walbarashathy i Shaqaaligy e Ohio e Owlaady Qaasky eh si usy kiingku kaalmey'y ku jawaabowky so'aalaga i wala athy ku welwelsingty o ku saabsing walbarashythy unuga. Si athy qof ungkuly hathyly haliyowky hiligy hory e ee abashythy, fadlang Waahthy kuly hariir:

- Taleefang: (614) 466-2650, misy wi'itaangky bilaashky e (877) 644-6338
- Iimeel: exceptionalchildren@education.ohio.gov

Futhythaayow

Hathy welwel ku qabty qiimeyowky i dib-ing-qiimeyowky unuga si usy ing hely walbarashythy gaarky e, misy athy welwel ku qabty barnaamijky Walbarashathy Shakhshi-haaned (IEP), wal ling kasow Futhydaayow ya luku yaaby ingty wal kiing tarang.

Futhydaayow waliba lingly jeede marky athy ku odsyty Waahthy ingty ye kiing suubythy qof o futhydaay'y e kaas o ku qiibgalow kulungky qiimeyowky unuga misy kulungky koohthy IEP (athy saas

oo kaleed waliba hubyng ku eta koohdang). Wakaalithy walbarashythy waliba sidaas oo kaleed odsythy korte Waahthy ingy ye ing suubythy qof futhydeey'y e haku qiihgalow ko ku mid e kulumeedas la hariirang walbarashythy gaarky e e unuga. Athy i wakaalithy walbarashythy waa ingy lamaadingby kyheliidang ingy qofky futhydeeyigy e haku haadiry doony kulungky.

UJEETHYTHY FUTHYDAAYOWKY

Futhydaayowky waliba ly suubiyey ingy lyky jery kulungky koohthy, tusaaly haang, kulungky koohthy barnaamijky walbarashythy shaqsi-haaned, kulungky qorsheeyowky qiimeyowky, misy kulungky koohthy qiimeyowky. Qofky futhydaayigy e waa qof lammaadingby hariir siingly lahaayn waany hubyng ungu haayn koohthy, waany koohthy go'aang iniing deerany. Ingy qof futhydeey'y e roogy waliba galang ku jeeysidaase ingy koohthy nagyty to wal-soo-saar le o waany diirithy saarasy arrymo ardaygy. Dadky futhydaayowky ling hilsaary walibuwa dhahdhahaadiyaal e o hirfid le haanas oo ha tababareng Hafiisky Owlaady Qaasky e, waany lahaky tabybari habraa'yithy walbarashythy gaarky e.

Waliba futhydaayowky odsythy korte amingty athy fadaas. Marky athy odsythy, athy i wakaalithy walbarashythy waa ingy lamaadingby kyheliidang ingy yo haku haadirang kulume. Hathy lamaadingby isky ratang, Hafiisky OwlaadyQaasky eh waliba kiing magy'aaway hal futhydeey'y. Futhydaayowkang wal qarash e mysiingkuku bahow athy iyo wakaalythy walbarashythy lamaadingby.

QOFKAY FATHYDAAYIGY E:

- Waliba haadey qof lammaadingby hariir siingly lahaayn o dhahdhahaad e (qofny myly safydow misy myly shaqeeow athy i wakaalithy walbarashythy)
- Walibuwa qofka kytabybarang *dhahadhahaadiyowky* (walibuwa qof hirfid ingy ingy usy dadky ku kaalmey'y haliyowky qilaafaadky)
- Walibuwa qof lahaky tabybary o waany si fayl ingy kasow shuruudo i shar'iyalky walbarashythy qaasky e
- walibuwa qof qiih ungu haayn IEP-gy unuga misy koohthy qiimeyowky
- Walibuwa qofka ingy deerany go'aang, laking ingy tilmaamown koohthy ingy yo hal helang
- Walibuwa qofka galang ku jeeysydow ingy wathyhadal lydhah dhyky athy i wakaalithy walbarashythy
- Walibuwa qof hagow kulungky waany ilaaliyow ingy qof welby ihtiraamy habraa'agy
- Walibuwa qof kydedaalow ingy koohthy diirithy saarang unuga i baahiyaalky unuga



QOTHYBIYAALKY MUHIIMKY E O E INGY LUKU HASUUSYNAATHY FUTHYDAAYOWKY:

- Futhydaayowky walibuwa ikhtiyaar.
 - Athy i wakaalithy walbarashythy lamaadingby waa ingy isky ratang ingy qiih ku nagytang habraa'agy. Hathy athy i wakaalithy walbarashythy isky ratang ingy qof futhydaay'y e haku qiihgaly kulungky, taas mi'inaashe me e ingy athy kyqasbingty ingy athy wakaalithy walbarashythy ku oglaaty wal welby ingy kulungky dareery misy ingy

athy ku ogolaaty sithy kulungky ling wedow. Waalidiingty waliba mar welby ling ogoliya ingty yo fikrydiyo dhiibyandang.

- Heliis kasty o lahaku deery kulungky futhydaayowky walibuwa ko shar'i e. Tang mi'inaashe walibuwa ingty athy i wakaalithy walbarashythy lamaadingby qasab siingky ety ingty ising ratang wala lahaky helii kudib marky go'aangky hasly wathy qaathytang.
 - Dukumenty kasty o athy i wakaalithy walbarashythy isly sahihdang o ku saabsing walbarashythy unuga misy IEP waliba lymid eya dukumentiyaalky lahaky sahihy kulumeethy kaleed e koohthy qiimeyowky misy IEP.

Si athy ing hely ma'aluumaad dheeraad e o kysaabsing futhydaayowky, booqoy webseedky Waahthy Walbarashathy iyo Shaqaaligy e Ohio o e [education.ohio.gov](https://www.education.ohio.gov) waany weydi **futhydaayow**.

Si Athy Ing Odsyty Futhydaayowky

La hariir agaasymaagy walbarashythy gaarky e wakaalithy walbarashythy si athy ing aragthy hathy degmythy ye diyaar ing ety ingty ye ku qiiqbqaathyty habaraa"agang, _____ kuly hariir _____. Marby hathy lamythy dhiny isku rahang ingty yo ku qiiqbqaathydang kulungky futhydaayowky, fadlang la hariir Hafiisky Waahthy Walbarashathy i Shaqaaligy e Ohio e Owlaady Qaasky e:

- Kuly hariir taleefang: (877) 644-6338
- Kuly hariir iimeel: OECMediationFacilitation@education.ohio.gov

Dhahdhahaadiyow


Dhahdhahaathiyow walibuwa marky athy i wakaalithy walbarashythy ky heliidang ingty qof sedahaad o hirfidly e haku haadiry kulungky si langkaas galang ungu jeeysithy ingty ising ku heliidang walbarashythy unuga naadify e misy unuga *lungku shakiisinyi ingty usy* qaby naafynimy. Qof sedahaad mi'inaashe walibuwa ingty qofkang, o sidaas oo kaleed ling kasow dhahdhahaadii, usy langny dhinishey ing rahaany i ingty usy iniing shaqeeany misy ing metelaany waalidky misy wakaalithy walbarashythy. Dhahdhahaadiyowky walibuwa hal siyaaby o athy misy wakaalithy walbarashythy doorithy kortang mar welby o dhating ku dhalythy qilaaf kysaabsing walbarashythy gaarky e o unuga.



DHAHDHAHAADIYOWKY WALIBUWA BILAASH WALIBANY LYODSYTHY KORY MAR KASTY

Dhahdhahaadiyowky waliba lyodsythy kory mar kasty. Marky dhahdhahaadiyowky lyodsythy, athy i wakaalithy walbarashythy waa ingty lamaadingby isky ratang ingty ku qiibqaathytang habraa'agy. Hathy lamaadingby isky ratang ingty ku qiibqaathytang, Hafiisky Owlaady Qaasky e waliba kiing magy'aawy doone dhahdhahaadii. Qofky dhahdhahaadiyaagy e mysiing sheegy kory sithy ising ing haly'yaasang arringty la hariirty walbarashythy gaarky e o unuga. Taas bedelshe, qofky dhahdhahaadiyaagy e waliba galang ku jeesydey ingty lamaadingby ku wathy hathylang qilaafky la hariiry unuga iyo ingty ising arringtaas hal ing helang.

Hathy athy go'aangsity inty athy gudbiithy abashy rasmi e misy ingty athy odsyty dhugungsidowky hannaanky qiimeyowky (fiiry bogy 17-28), Waahthy Walbarashathy i Shaqaaligy Ohio waliba kywarsithy doongte ingty athy marky koowad tihgiliithy dhahdhahaadiyow. Dhahdhahaadiyowky wal



qarash e mysiingkuku bahow athy i wakaalythy walbarashythy lamaadingby.

QOFKY DHAHDHAHAADIYAAGY E:

- Waliba haadey qof lamaadingby hariir siingly lahaayn o dhahdhahaad e (qofny myly safydow misy myly shaqeeyow athy i wakaalithy walbarashythy)
- Mal ing ogol ingty usy deery go'aang; taas bedelshe, qofky dhahdhahaadiyaagy e waliba siingku keelmeyey athy i wakaalithy walbarashythy ingty ising haliidang arringty la hariirty walbarashythy gaarky e o unuga.
- Waliba lyshaqeeyay athy i wakaalithy walbarashythy si ising ing go'aamydang heliis dhahdhahaading e o qoraal e.
- Walibuwa qof hagow kulungky dhahdhahaadiyowky waany ilaaliyow ingty qof welby ihtiraamy habraa'agy
- Walibuwa qof ku shaqeeyow ingty qof welby diirithy saar ardaygy i baahiyaalky ardaygy
- Walibuwa qofka galang ku jeeysydow ingty wathyhadal lydhah dhyky athy i wakaalithy walbarashythy

QOTHYBIYAALKY MUHIIMKY E O E INGTY LAKU HASUUSYNAATHY DHAHDHAHAADIYOWKY

- Dhahdhahaadiyowky walibuwa ikhtiyaar.
 - Athy i wakaalithy walbarashythy lamaadingby waa ingty isky ratang ingty qiib ku nagytang habraa'agy. Hathy athy i wakaalithy walbarashythy isky ratang ingty ku qiibqaathytang dhahdhahaadiyowky, taas mi'inaashe me e ingty athy kyqasbingty ingty athy wakaalithy walbarashythy ku oglaaty wal welby ingty kulungky dareery misy ingty athy ku ogolaaty sithy kulungky ling wedow.
- Dhahdhahaadiyowky walibuwa qarsoothy.
 - Wal welby o lyky dhah sheegy kulungky dhahdhahaadiyowky waa ingty ly ilaalii qarsoothynimydiyo (sir haaty) waany mal isti'imaaly kary mar kaleed, marky luku reeby hathy taanzul lysuubii.
- Walaagy heliis qoraal e o haku baha dhahdhahaadiyowky walibuwa shar'i. Tang mi'inaashe walibuwa ingty athy i wakaalithy walbarashythy lamaadingby qasab siingky ety ingty ising ratang wala lahaky helii kudib marky go'aangky hasly wathy qaathytang.
 - Dukumenty kasty o athy i wakaalithy walbarashythy isly sahihdang o ku saabsing walbarashythy unuga misy IEP waliba lymid eya dukumentiyaalky lahaky sahihy kulumeethy kaleed e koohthy qiimeyowky misy IEP.

Si Athy Ing Odsyty Dhahdhahaadiyow

La hariir agaasymaagy walbarashythy gaarky e wakaalithy walbarashythy si athy ing aragthy hathy degmythy ye diyaar ing ety ingty ye ku qiibqaathyty habaraa"agang _____ kuly hariir _____. Marby hathy lamythy dhiny isku rahang ingty yo ku qiibqaathydang kulungky dhahdhahaadiyowky, fadlang la hariir Hafiisky Waahthy Walbarashathy i Shaqaaligy Ohio e Owlaady Qaasky e:

- Kuly hariir taleefang: (877) 644-6338
- Kuly hariir iimeel: OECMediationFacilitation@education.ohio.gov

Gudbiyowky Abashy Goboleed

Qaab kaleed o athy ing halii korty, hathy athy qabty welwel la hariiry walbarashythy gaarky e o unuga, walibuwa ingty athy abashy rasmi e o qoraal e athy ku gudbiithy wakaalithy walbarashythy, ingty athy abashydang ing gudbiithy Hafiisky Waahthy Walbarashathy iyo Shaqaaligy Ohio e Owlaady Qaasky e.

WAL QARASH E MYKOOKY BAHOW INGTY ATHY GUDBIITHY ABASHYTHY GOBYLKY

Wal qarash e mykooky bahow ingty athy gudbiithy abashythy gobylky Hannaangky abashythy gobylky ingty badang waliba dhibaathythy ing haliyaase si ku dhaqsy badang dhugungsidowky hannaanky qiimeyowky, waany is-horkooyow badang myleh (is-horfadhiisow badang ming baahang) marky ling barbardhyky dhugungsidowky hannaanky qiimeyowky. Si athy ing gudbiithy abashythy gobylky, waa ingty athy abashy qoraal e o sahihing (noo'igy asalky e) ing gudbiithy Hafiisky Owlaady Qaasky e, waany waliba qasab aha ingty *koobigy* abashythy si toos e ingkyky dirty wakaalithy walbarashythy.

Abashythy waa ingty ye kyjerty qoraal/bayaang ku hathy low hadgudubky lyky suubii shuruudo walbarashythy gaarky e o gobylky misy fithyraalky (hadgudubky lyky suubii Shar'igy Walbarashythy Shaqsiyaadky Naafydye misy Heeriky Hawlgalky Ohio ee Walbarashythy Owlaady Naafydy e).

Abashythy qasab me e ingty ky qorynaathy magaagy misy hiigsidhowky shar'i gaar e, laking ming baahang ingty lyky dhah sheegy fi'il misy fi'il-dory o wakaalithy walbarashythy suubythy o athy aamingsingty ingty hadgudub ky eyi shuruudo walbarashythy gaarky e. Sidaas oo kaleed, waa ingty athy abashythy kyqorty haqiiqooyinky taagerow sababty athy ingky maleeyas ingty wakaalithy walbarashythy ingky hadgudubty shuruudo wakaalithy walbarashythy.

DIB-ING-EEGOWKY ABASHYTHY GOBYLKY

Hafiisky Owlaady Qaasky e ya dib-ing-eege o waany, hathy lamy huraang ety, baaritaang kysuubii doony abashythy sithy sahthy e ling buuy, isla markaasny go'aang ku deery doony hathy wakaalithy walbarashythy ka hadgudubty shuruudo walbarashythy gaarky e o la hariiry walbarashythy unuga. Sidaas oo kaleed, qof sedahaad – o ing haayny athy, misy wakaalithy walbarashythy misy urur ku bedeling wakaalithy walbarashythy – ya Waahthy ing gudbii kory abashythy gobylyk hathy qofkaas aamingsinyi ingty wakaalithy walbarashythy ky hadgudubty shuruudo walbarashythy gaarky e o la hariirang ardaygy.

Abashythy gobylyk waliba ling gudbii kore Waahthy waqti kasty ingty lyky jery *hal siny gudaashe* lahaku bilaawy waqtygy usy dhii hadgudubky walbarashythy gaarky e o luku da'awoodahaay. Abashy kasty o lukuky da'awoodow hadgudub dhii wal ku badang hal siny lahaku bilaawy taariqthy lygudbii abashythy, mal baary doony/mal halii doony.

SITHY LING GUDBIYOW ABASHYTHY RASMIGY E O GOBYLKY

Hathy athy jeelathy lahaaty ingty athy gudbiithy abashythy rasmigy e o gobylyk taas oo la hariirty walbarashythy gaarky e, waa ingty athy:

- Buuyty foomky abashythy gobylyk o luku helow [webseeedyky Haliyowky Qilaafaadkay DEW \(DEW Dispute Resolution\)](#); misy
- Qorty waraag abashy e, waany ingty athy ingdirtuu Waahthy adigo isti'imaalas boostythy misy iimeel; misy
- Weerty shaqaaligy Hafiisky Waahthy Owlaady Qaasky e adigo ku weeras 1-877-644-6338, waany ku odsydaas foomky abashythy, kaas o athy buuy'y doongty waany hang nagy doongty Waahthy.

MEELY LING DIROW ABASHYTHY

Abashyda waa ingty isku mar ling dirywu *lamaadiyoby* Hafiisky Waahthy Walbarashythy i Shaqaaligy Ohio ee Owlaady Qaasky e i maamulaagy wakaalithy walbarashythy.

Abashythy rasalky e ing dir:

Hafiisky Waahthy Walbarashythy i Shaqaaligy Ohio ee Owlaady Gaarky e

Attn: Kaaly'yaagy Maamulaagy Qiiibty Haliyowky Qilaafaadky

25 South Front Street, Mail Stop 409

Columbus, Ohio 43215-4183

limeel haang: oeccomplaints@education.ohio.gov

HAKIYOW

Hakiyow waliba lyky wede dib ing dhykowky arringty abashythy gobylyk. Hathy athy i wakaalithy walbarashythy ising kylug weeldhytang dhugungsidowky hannaanky qiimeyowky, waany athy misy wakaalithy walbarashythy kooking usy gudbii abashythy gobylyk o ku saabsing isly arringtaas,

Waaahthy Walbarashythy i Shaqaaligy Ohio waliba hakii doongte abashythy gobylky. Si kaleed marky ling sheegy, Waaahthy waliba sugy doongte ilaa arringty kaleed lahaku dhamaayow kuhor ingty ye hal iniing weydiiny abashythy gobylky. Hathy athy ku nagty odsygy dhugungsidowky hannaanka qiimeyowky, Waaahthy waliba abashythy gobylky ku saary doongte hakiyowky, walybany sii guthy galy doongte haliyowky abashyda.

Hathy dhugungsidowky hannaangky qiimeyowky lysuubii o waany go'aang usy deery sarkaalky dhugungsidowky ee dhahdhahaadky e (IHO), markaasoy Waaahthy waliba abashythy ku saary doongte hakiyowky si ling halii qiibo ku mid e abashythy haanas o go'aang lungku deerny wily.

HABRAA'AGY ABASHYTHY GOBOLKY

Marky Waaahthy hely abashyda gobylky, hadiiby si fayl lahang gudbii, waliba lybilaawy doone ingty dib ing eeow lyky suubii, hathy lama huraang etyny, waliba lybaary doone hadgudubky(hadgudubyte) lysheegy ingty lyky suubii shuruudo walbarashythy gaarky e. Hafiisky Owlaady Qaasky e waa ingty usy arringty ka halii 60 maalmood gudaasho lahaku bilaawy taariqthy hafiisky hely abashythy.

Yeedo qiib ku e habraa'agy abashythy, Hafiisky Owlaady Qaasky e waliba:

- Dib ing eegy doone abashythy waany go'aamii doone ingty hafiisky ley'y awood usy kyhalii hadgudubyo lyky sheegy abashyda
- Athy i wakaalithy walbarashythy lamaadingby qoraal siingky sheegy doone hadgudubyo hafiisky halii doony, o kyjerang walaagy baarytaang e (hathy lamy huraang nagty)
- Athy i wakaalithy walbarashythy lamaadingby ha siing bangdhyky doone habraa'yithy dhahadhahaadiyowky i futhydaayowky si ising ing haliisytang abashythy

Liisky Wala Athy Qasab Kii e Ingty Athy Kydarty Abashythy Gobylky

- Bayaang/qoraal ku hathylow ingty wakaalithy walbarashythy ky hadgudubty shuruudo walbarashythy gaarky e o gobylky misy fithyraalky
- Sharahaad kysaabsing dhibaatythy jerty, adigo kydaraas haqiiqooyingky athy kysaleeyahaaty abashyda
- Ma'aluumaadky lahakooly hariirow i sahiihaga asalky e
- Hathy athy ku da'awoodahaayt ingty hadgudubky walbarashythy gaarky e lyky beegsithy arday gaar e
- Magaagy i ingwaangky meely usy kynooly ardaygy
- Magaagy iskoolky ardaygy dhykydahaay
- Hathy unugy misy qofky dhalingerythy e usy eyi lang id-laang e (sithy lyky sharahi Shar'igy Kaalmythy Dadky Id-laangty e ee McKinney-Vento (McKinney-Vento Homeless Assistance Act)) ma'aluumaadky lyhely kory o lukuly hariirow ardaygy i magaagy iskoolky ardaygy dhykydow
- Sharahaad kysaabsing noo'igy dhibaatythy, yeedo lyky darow haqiiqooyingky la hariirang dhibaatythy
- Halky lahang jeedii dhibaatythy, ingty yo ku warhaayang qolooyingky kylug le dhibaatythy
- hiligy abashythy lygudbiyow
- Abashythy waa ingty sahiih lahaaty.

Hasuusynaaw ingty abashooyingky qarsoong ling ogolaathy doongny.

- Athy i wakaalithy walbarashythy lamaadingby sing warsithy doone walaagy ma'aluumaad dheeraad e o kysaabsing hadgudubyo kyqoring abashyda
- Dib-ing-eegow kysuubii doone dukumentiya i ma'aluumaadky dheeraadky e o athy i wakaalithy walbarashythy siideng, waliba suubii doone waraysi taleefangky e, waany waliba booqythy doone wakaalithy walbarashythy unuga, hadby sithy lama huraang nagythy
- Wakaalithy walbarashythy fursyd ingsii doone ingty ye haku jawaabty abashyda, walibany ha jeedii doone hal
- Qory doone warqad lysiingkyky wargiliyow athy i wakaalithy walbarashythy go'aangky kysaabsing ingty hadgudub lyky suubii shuruudo walbarashythy gaarky e i ing kaleed (kudib marky laha dhamaay dib-ing-eegowky i baarytaangky, hathy lamy huraang nagythy, wal ungly bathynaayny 60 maalmoody lahaku bilaawy taariqthy hafiisky usy hely abashyda)

KORDHIYOWKY MUDUNGTY

Waahty waliba qaathythy korte wal ku badang 60 maalmoody si ye ing haliithy abashythy i si ye hang saarty waraaqthy go'aangky, hathy jerty kordhiyowky mudungty. Kordhiyowky mudungty 60-ky maalmoody e si ling hali abashythy gobyly waliba lysuubii kory marky:

- Athy i wakaalithy walbarashythy isky ratang ingty lykordhii mudungty si lamaading inisky deeshang ingty arringty kyhaliidang habraa'igy dhahdhahaadiyowky, futhydaayowky, misy qaab kaleed o haliyowky qilaafaadky e, misy marky
- Jerang daruufuoying gaar e (daruufogas o go'aamiyow Hafiisky Owlaady Qaasky e).

SI QALDING ING GUDBIYOWKY ABASHYTHY

Hathy Hafiisky Owlaady Qaasky e go'aamythy ingty athy si fayly ha niing gudbiiny abashythy gobyly maadaama athy ingky darny ma'aluumaad muhiim e o kysaabsing arrinty athy fadaasy ingty lyhalii, misy hathy Hafiisky Owlaady Qaasky e usy awood iniing lahaayny ingty usy baarytaang kysuubii abashythy, Hafiisky Owlaady Qaasky e waliba hakiing diry doone waraag sharahaas sababty hafiisky hool ungly qobydahaayn abashyda, sababty ku dambooyt go'aangkas, i, hathy ye quseeety, ma'aluumaadky athy ing baahangty ingty athy haky darty abashythy usub si ling tihgilee ingty ye ety to si fayl la hang gudbi.

MAR KALEED GUDBIYOWKY ABASHYTHY

Hathy athy mar kaleed gudbiyahaaty abashythy athygo kydaraas ma'aluumaad usub, haqiiy ingty athy abashythy ing dirty Waahty Walbarashythy i Shaqaaligy Ohio i wakaalithy walbarashythy hal siny gudaashe lakaku bilaawy amingty lysuubii hadgudubky walbarashythy gaarke e o luku da'awoodahaay. Hathy athy abashythy kydarty wal o Waahty awood iniing lahaayny ingty ye haliithy, waliba kiing sheegy doongte meelo athy kaalmy ku hely korty si ling hali arringtaas, hadby sithy markaas kyhaboong.

Gudbiyowky Abashy

- Abashy lygudbii sinyd gudaashey lahaku bilaawy hiligy hadgudubky
- Waalidky waliba waraagthy abashythy o asalky e ing direy Waahthy Walbarashythy i Shaqaaligy Ohio, waraagthy koobygy waliba ing direy wakaalithy walbarashythy.
- Abashythy waa ingty ye haaty to o sheegas hadgudubyo lyky suubii shuruudo walbarashythy gaarky e yeedo lyky qorow haqiiqooying taagerow arringtaas.

Waahthy Walbarashythy i Shaqaaligy Ohio Waliba Dib Ing Eegase Abashythy

Waahthy waliba helowky waraagthy ingsheegase qofky ha gudbii abashythy i wakaalithy walbarashythy.

Waahthy waliba diraase waraag lyky diidow abashythy hathy abashythy lahang gudbii si qalding, misy hathy Waahthy ing lahaayn awood ye kyhaliithy abashythy.

Dib-ing-eegow

Waahthy waliba dib ing eegase dhamaang dukumentiyaalky, walibany odsydaase dukumentiyaal/ma'aluumaad dheeraad e hadby sithy ling baahathy.

Waahthy waliba waraysi ku qaadase shaqsiyaadky kyhaboong, hadby sithy lingky baahathy.

Waahthy Waliba Ha Diraase Waraagthy Natiijooyingky

Waahthy waliba go'aang ku deerase mid kasty o ku mid e hadgudubyo lysheegy i hathy lysuubii hadgudub ky eeding walbarashythy gaarky e.

Waahthy waliba ha saarase tilaabooying arringty lyky sahow meelogy lyky arygy ingty wakaalithy walbarashythy kysuubithy hadgudub.

Gudbiyowky Abashy La Hariirty Hannaanky Shar'igy eh

Hal siyaabod o athy i wakaalithy walbarashythy ing hali kortang abashooyingky qaar e kysaabsing walbarashythy gaarky e o unuga walibuwa ingty athy gudbiithy odsygy dhugungsidowky hannaagky qiimeyowky, odsygaas o athy si toos e ingky gudbiyaas wakaalithy walbarashythy, adigoo saas oo kaleed kooby ing diraas Waahthy Walbarashythy i Shaqaaligy Ohio. Marky saas weely, waliba gudbiidey abashythy hannaangky qiimeyowky (o saas oo kaleed ling kasow odsygy hannaangky qiimeyowky).

Waliba jere dad kaleed o gudbii kory abashythy hannaangky qiimeyowky:

- Arday, hathy usy jery ingky yeraang 18 siny
- Wakaalithy walbarasythy



SABABO LING GUDBIYOW ABASHYTHY

Abashythy hannaangky qiimeyowky waliba lygudbii kore marky welwel luku qaby meelagung ha dareerang o ku mid ah walbarashythy gaarky e o unuga:

- Agoonsidowky unug naafy e
- Qiimeyowky unug naafy e
- Meeloyowky walbarashythy o unug naafy e
- Siyowky walbarashythy dadwiinagy e bilaashky e (FAPE) unuga

Abashythy hannaangky qiimeyowky waa ingty ye sheegthy ingty lyky hadguduby shuruudo walbarashythy gaarky e o fithyraalky misy gobylyky, waany abashythy ingty lygudbii *lamy siny* gudaashe lahaku bilaawy taariqthy waalidky (misy wakaalithy walbarashythy dadwiinagy o gudbiyaas abashythy) ogaathy misy wal ku ogaathy hadgudubky walbarashythy gaarky e o luku da'awoodahaay. Mar kasty o Waahthy Walbarashythy i Shaqaaligy Ohio hely abashythy hannaanky qiimeyowky, waalidiingty i wakaalithy walbarashythy waa ingty yo fursyd ing helang ingty yo ku qiiqqaathydang dhugungsidowky hannaanky qiimeyowky. Dhugungsidowky hannaangky qiimeyowky walibuwa habraa'a rasmi e kaas o sarkaal dhahdhahaad e ye Waahthy ing hilsaaras ingty usy suubii dhugungsidowky arringty si ling hali abashythy hannaangky qiimeyowky.

MA'ALUUMAADKY LING BAAHANYI INGTY LYKY DARY

Waahthy waliba dhiibase foom ling isti'imaaly kory ingty lyky odsythy dhugungsidowky hannaangky qiimeyowky. Qofky misy wakaalithy walbarashythy dadwiinagy o gudbiyaas odsygy qasab myky e ingty isti'maaly [foomky Waahthy](#), laking qofkaas misy ururky waa ingty kydary ma'aluumaadky ling baahanyi marky lygudbiyow abashythy hannaangky qiimeyowky:

1. Magaagy ardaygy
2. Ingwaangky ardaygy misy ma'aluumaadky lukuly hariirow
3. Magaagy wakaalithy walbarashythy
4. Hathy unuga ey'y id-laang, waliba ling baahanya ma'aluumaadky lukuly hariirow unuga ingty lyhely kory i magaagy iskoolky unuga dhykydow
5. Sharahaad kysaabsing dhibaatythy gaarky e o quseeety unuga, i sidaas oo kaleed haqiiqooyingky kysaabsing dhibaatythy
6. Fikrydo misy walaagy soo jeeding e o lyky haliyow dhibaatythy

Abashythy hannaangky qiimeyowky waa ingty lahaky qory ma'aluumaad faahfaahsing si lymid e abashythy gobylyky (fiiry bogy 16); si kasty haato, sahih asal e qasab me e. Waraagthy waliba wakaalithy walbarashythy i Waahthy lingky jeey'y kory galang, waliba ling marsii kory boosty, fakis, misy iimeel. Walaagy arring e o athy koowty hangky darny abashythy hannaangky qiimeyowky, sarkaalky dhugungsidowky myfiirii doone ingty lyky jery dhugungsidowky hannaangky qiimeyowky.

WAL KU BEDELOWKY ABASHYTHY HANNAANGKY QIIMEYOWKY

Wal ku bedelowky abashythy hannaangky qiimeyowky waliba lingly jeede usbooneysiyowky abashythy kudib marky ling gudbii Waahthy Walbarashythy i Shaqaaligy Ohio. Waliba wal ku bedely kory abashythy hannaangky qiimeyowky keliya hathy:

- Qolooyingky kaleed o arringty kylug le ogolaadang ingty abashythy hannaangky qiimeyowky wal luku bedely, qoraal haang ing ogglaadang wiliby, waany lysii fursyd yo abashythy ingky

haliyang kulungky haliyowky qilaafaadka (kulungky haliyowky qilaafaadka waliba lyky sharahey bogy 23), misy

- Sarkaalky dhahdhahaadky e o dhugungsidowky usy ogolaathy. Sarkaalky dhugungsidowky waliba dhiiby kory ogolaashythy noo'as e ilaa shang maalmood kuhor ingty dhugungsidowky hannaangky qiimeyowky ing bilaawyny, laking mal ogolaadow walaagy markaas ku dambooy.

Habraa'yithy i Wakhtiyaalky Hannaangky Qiimeyowky

Hathy athy abashythy hannaangky qiimeyowky ku gudbiithy wakaalithy walbarashythy unuga, 10 maalmood gudaasho marky lyhely abashythy hannaangky qiimeyowky, wakaalithy walbarashythy waa ingty ye kysiithy ogeysiis hormaris e o qoraal e misy jawaab la hariirty hadgudubky lyky suubii shuruudo walbarashythy gaarky e, marky luku reeby hathy wakaalithy walbarashythy ye yooby kysiithy ogeysiisky noo'as e.

Ogeysiisky hormarisky e o qoraalky o wakaalithy walbarashythy hakiing diraas waa ingty yo kyjerang:

- Sharahaad kysaabsing tilaabythy ye kysaabsingty odsygy misy abashyda. Tilaabydang waliba nagythy korte tilaaby wakaalithy walbarashythy fadaasy ingty ye qaathy misy tilaaby ye diithy ingty ye qaathy. Wakaalithy walbarashythy waa ingty ye saas oo kaleed sharahaad ku biithy sababty iskoolky ing fadaay'y ingty usy qaathy tilaabydaas misy sababty usy ing diithy ingty usy qaathy tilaabydaas.
- Sharahaah kysaabsing dhamaang qaabybky wakaalithy isti'imaaly ingty ye qiimeyty unuga, diiwaano kysaabsing unuga, i warbihino wakaalithy walbarashythy ing isti'imaaly ingty ye deerty go'aangky e ingty ye qaathy tilaabythy misy ingty ye diithy qaadowky tilaabythy.
- Sharahaad kysaabsing fursydo kaleed o koohthy IEP ing tihgiliyeng unuga i sababty(sabybo) ling diithy fursydoogas
- Sharahaad kysaabsing qothybiyaalky kaleed o quseey'y go'aangky o wakaalithy walbarashythy o haay ingty ye qaathy misy ing qaadny tilaabythy

Wakaalithy walbarashythy waa ingty ye saas oo kaleed kysiithy ma'aluumaadky kysaabsing aawimaathy shar'igy o bilaashky e misy qiimyshe hoosey i adeegyo kaleed o athy hely korty.

Hathy abashythy hannaangky qiimeyowky athy lahakoo gudbii ka waalid haang, waa ingty athy abashythy kuku jawaabty 10 maalmood gudaashe. Jawaabty waa ingty ye si gaar e ingku hathyly arringty lykysheegy abashythy hannaangky qiimeyowky.

Kyfilinaadow

Abashythy hannaangky qiimeyowky waliba ling tihgilee doone ingty ye ety to kaamil e (taas o mi'inaashe eyi ingty si fayl lahang gudbii) *marky luku reeby hathy* qolooyinky kaleed o arringty kylug le yo ogeysiis ing dirang sarkaalky dhahdhahaadky e o dhugungsidowky iyo qolooyinky ha gudbiyeng abashythy, yoogo sheegayang ingty abashythy ing buuyny shuruudo gudbiyowky (tusaaly haang, ingty ye kaamil ing haayny). Qolooyinky kaleed waa ingty yo ku hathylang kaamil haadowky abashythy, qoraal haang, 15 maalmood gudaashe lahaku bilaawy amingty lyhely abashythy hannaangky qiimeyowky.

Tusaaly haang, hathy athy abashythy hannaangky qiimeyowky ing gudbiithy wakaalithy walbarashythy (o waany koobygy abashythy ing gudbiithy Waahthy Walbarashathy i Shaqaaligy ee Ohio), abashydaas

Dhugungsidowky Hannaangky Qiimeyowky Waliba Suubiyey Sarkaalky Dhahdhahaadky e o Dhugungsidowky

Marky abashythy hannaangky qiimeyowky ye hal lungky deery korny, waliba ing guthyby doongte dhugungsidowky rasmigy e o usy suubiyow sarkaalky dhahdhahaad e o dhugungsidowky. Sarkaalky dhugungsidowky waa ingty usy haathy abuukaaty ye tabybarty Waahthy Walbarashythy i Shaqaaligy Ohio si usy ing suubii dhugungsidowky abashythy hannaangky qiimeyowky.

Wakaalithy walbarashythy ya dhiibas qarashaadky sarkaalky dhugungsidowky; si kasty haato, qofkang walibuwa qof dhahdhahaad e, o lamaadingby hariir siingly lahaayny, kaas o lahang doorydow si o bakhty nasiib e. Sarkaalky ming shaqeeeyow wakaalithy walbarashythy kylug le arringty, wal o dany shaqsiyeed misy dany shaq e mingky jery o usy ingky hiiliyow lang ising siingku mid e.

Taas weliba ing dheera, sarkaalky dhugungsidowky waliba si fayl ing kasey shuruudo walbarashythy gaarky e, o ku mid IDEA, heeryrky iyo shar'iyaaalky fithyraalky iyo gobylky, iyo sithy mahkamyo ing turjumaayang kiisisky walbarashythy gaarky e.

Dhugungsidowky ku dib, sarkaalky dhugungsidowky waliba qory doone go'aang waafaqsing heeryrky shar'igy.

waliba ling tihgilee doone to kaamil e marky luku reeby hathy wakaalithy walbarashythy ye ogeysiithy sarkaalky dhugungsidowky, qoraal haang i 15 maalmood gudaashe, yeedo sheegas ingty ye iniing maleeyany ingty odsyga si fayl lahang gudbi. Markaasoy, sarkaalky dhugungsidowky waliba haasythe shang maalmood lahaku bilaawy amingty usy hely ogeysiisky qoraalky e o wakaalithy walbarashythy, si usy ing go'aangsithy hathy abashyda hannaangky qiimeyowky ye ety to kaamil e/dhameestiring (Ingty ye buuyty shuruudo abashythy hannaangky qiimeyowky o lyky sharahy bogy 22). Sarkaalky dhugungsidowky waa ingty saas oo kaleed go'aangshey ha siing diry athy i wakaalithy walbarashythy, qoraal haang, 15 maalmood gudaashe.

Hathy sarkaalky dhugungsidowky go'aangsithy ingty abashythy hannaangky qiimeyowky ye ety to kaamil ing haayn/ing dhameestiry naayn, waliba fursyd ing haasyte ingty athy mar kaleed ha gudbiithy abashy usub misy ingty athy wal ku bedely abashythy asalky e, hadiiby wakaalithy walbarashythy ogoly waany fursyd ing helaas ingty ye arringty kyhaliithy kulungky haliyowky qilaafky misy sarkaalky dhugungsidowky ogolaathy wal ungu badanaayny shang maalmood ku hor bilaawky dhugungsidowky.

Hathy athy si fayl wal ungu bedely abashythy hannaangky qiimeyowky, markaasow mudungty haliyowky arrinty o 30-ky maalmood e waliba bilaawyaase marky athy ha gudbiithy abashythy wal lahaku bedely.

Muthythy Haliyowky

Mudungty haliyowky walibuwa waqtigy ing dhaheey'y gudbiyowky abashythy hannaangky qiimeyowky i dhugungsidowky rasmigy e o arringty. Mudungty haliyowky waliba kyjery kulungky haliyowky qilaafaadky kaas o biyow fursyd e ingty, mar kaleed, lyhalii qilaafky ku teegeng walbarashythy gaarky e ku hor ingty si rasmi e lnyiing bilaawny dhugungsidowky. Hathy gudbiithy abashythy hannaangky qiimeyowky laking athy ku qiibqaathythy waayty hannaangky haliyowky qilaafky, arringtaas waliba dib ing dhykaase bilaawowky waqigy hannaangky qiimeyowky (ma'aluumaad dheeraad e o kysaabsing waqtigy waliba kyqorinya hoos).

Mudithy Haliyowky walibuwa 30 maalmood o luku bilaawow taariqthy lygudbi abashythy hannaangky qiimeyowky (misy lahaku bilaawy taariqthy abashythy si fayly wal lungku bedely). Hathy wakaalithy walbarashythy ye ing haliiny abashythy hannaangky qiimeyowky qaab athy ky qana'aasy marky dhamaaty mudungty 30-ky maalmood e, dhugungsidowky hannaangky qiimeyowky ya ling guthybe. Marky dhamaaty mudungty haliyowky arrinty o 30-ky maalmood e, waliba jerty mudung 45 maalmood e o lungky talygaly dhugungsidowky hannaangky qiimeyowky i ingty sarkaalky dhugungsidowky deery go'aang (fiiry bogy 22), marky luku reeby hathy athy i wakaalithy walbarashythy isky ratang ingty dhahdhahaading martang kaas oo qaathydow waqty ku badang 30-ky maalmood. Saas oo kaleed, ogaaw ingty mudungty haliyowky arrinty o 30-ky maalmood e ye dhamaathy korty waqti hory hathy, ingty lyky jery 30-kaas maalmood, athy i wakaalithy walbarashythy isky ratang qoraal haang ingty wal heliis e ling deery korny.

Inty lyky jery mudungty haliyowky arrinty o 30-ky maalmood e, i ingty lyky jery 15-ty maalmood ingky horeeyty o helow abashythy hannaangky qiimeyowky, wakaalithy walbarashythy waa ingty ye qorsheeyty kulungky haliyowky. Hathy wakaalithy walbarashythy ye ing qobyny kulungky haliyowky 15 maalmood gudaashe misy ungy qiibqaathyny kulungky haliyowky, waliba odsythy korty ingty sarkaalky dhugungsidowky bilaaby waqtigy dhugungsidowky hannaangky qiimeyowky o 45-ty

maalmood e. Wakaalithy walbarashythy qasab myky e ingty ye qorsheeyty kulungky haliyowky arringty hathy ye gudbiithy abashythy hannaangky qiimeyowky.

KULUNGKY HALIYOWKY ARRINGTY

Ujeedky kulungky haliyowky arringty waliba lungky talygaley ingty athy fursyd ingty hely ingty athy ku hathyly dhibaathyty lyky sheegy abashythy i si wakaalithy walbarasythy ing hely fursyd ye kookuly shaqeeyty hal deerow. Masuuliithy waliba saaryngta wakaalithy walbarashythy ingty ye ha qabangqaabythy kulungky haliyowky arringty, adiiny waliba lykiingku baahanya ingty athy ku qiibqaathyty. Hathy athy ingku qiibqaathyny kulungky haliyowky arringty o waany wakaalithy walbarashythy ye diiwaang gylithy ingty athy ungku qiibqaathyny, wakaalithy walbarashythy waliba sarkaalky dhugungsidowky ku odsythy korte ingty lusku dhaafy abashyda hannaangky qiimeyowky marky lydeery dhamaadky mudungty 30-ky maalmood e.

Athy i wakaalithy walbarashythy waliba go'aang ku deerasana hubno koohthy IEP o haku qiibgalaayang kulungky haliyowky arringty. Kulungkung waa ingty usy haku haadiry wakiil metelow wakaalithy walbarashythy kaas o awood ing le ingty usy wakaalithy walbarashythy go'aang ing deery.

Abuukaatygy wakaalithy walbarashythy mahaku qiibgaly doony kulungkung marky luku reeby hathy athy go'aangsyty ingty athy lykoopty abuukaatyga. Kulungkung walibuwa tilaaby qasab e ingty lyqaathy ingty lyky jery hannaangky hal ing weydiyowky arringty marky luku reeby hathy athy i wakaalithy walbarashythy isky ratang qoraal haang ingty ising usku dhaaftang kulungky haliyowky arringty, misy hathy athy i wakaalithy walbarashythy isky ratang ingty ising isti'imaalang dhahdhahaadiyow bedelky kulungky haliyowky arringty. Athy i wakaalithy walbarashythy waliba lysiing ogoliya ingty ising dhahdhahaadiyowky sii wethytang marky dhamaaty mudungty 30-ky maalmood e o haliyowky qilaafaadky hathy lamaadingby isky ratang ingty saas weelang. Arringtang waliba meely ku saarase mudungty dhugungsidowky hannaangky qiimeyowky o 45 maalmood e i ingty lybilaawy waqtigy go'aang deerowky.

Hathy athy i wakaalithy walbarashythy haliisytang qilaafking ingty lyky jery kulungky haliyowky arringty, lamaadingby waa ingty sahihdang heliis shar'i e o:

- Qeehow wala lysuubii doony o qoraal e
- Athy i wakiilky wakaalithy walbarashythy lamaadingby sahihasang
- mahkamyd dhagang gilii korty

Shar'i e waliba lingly jeede hathy dhiithy ingty athy misy wakaalithy walbarashythy kooking ing hogaangsimy waay'y heliisky, mahkamyd siingky qasaby korty ingty athy misy wakaalithy walbarashythy ing hogaangsingty.

Hathy athy misy wakaalithy walbarashythy lamaading koosho go'aangsithy ingty usy ku nagythy heliisky marky lysahiihy kudib, lang siingku mid e yo kansaly kory heliisky sethy maalmood gudaashe lahaku bilaawy maalingty heliisky lysahiihy.

Hathy athy i wakaalithy walbarashythy kuheliideng abashythy hannaangky qiimeyowky ingty ing dhamaany mudungty haliyowky arrinty ee 30-ky maalmood e, abashythy wal hire maany jeraas dhugungsidowky hannaangky qiimeyowky o lyqobythy doony.

Hannaangky Dhugungsidowky

